

Talobixiyaha arrimaha qaraabada Åsa Svärd waxay kuugu soo dhaweyneysaa

- Talo iyo taageero ku saabsan arrimaha qaraabada
- Wadahadal keli ee aad adigoo deggan oo nabad qaba heleysid fursad aad kusoo bandhigto fikradahaaga iyo dareenkaaga ku saabsan xaaladaada.
- Booqasho guri

Talobixiyaha qaraabada waxaad kala xiriiri kartaa telefoonka 0278-257 16

Kalkaalisada cudurka dhaawaca xasuusta ee Marianne Sundström waxay kuugu soo dhaweyneysaa

- talobixin
- wadahadalo keli oo gaar ah
- in haddii loo baahdo qofku aadi karo booqasho guri ama lasoo booqan karo
- u sameynaya xiriiryada daryeelka caafimaadka

Kalkaalisada cudurka dhaawaca xasuusta waxaad kala xiriiri kartaa telefoonka 0278-253 08

DIRE

Degmada Bollnäs
Xafiiska maamulka arrimaha bulshadda
Telefoonka: 0278-257 15
Boostada elektarooniga:
anhorigstod@bollnas.se
Cinwaanka booqashada: Våggatan 11
Cinwaanka boostada 821 42 Bollnäs
www.bollnas.se/anhorigstod

Kaalmada Qaraabada

Xafiiska adeegga bulshadda ee degmada Bollnäs



BOLLNÄS  KOMMUN

Anhörigstöd i Bollnäs/Kaalmada qaraabada ee Bollnäs

Qofka qaraabada ah ayaa wuxuu u baahnaan karaa kaalmo iyo daryeel iyo nasiino, waqti uu keligii ahaado ,nasiino dheeraad ama in uu la sheekeesto qof fahmaya xaaladda uu ku jiro. Kaalmada qaraabada waa dadaalo kala duwan ee loogu talo galay in loogu sahalsiiyo qofka haysta qaraabo dhaw ee xanuunsan, curyaanimu, si xun wax u isticmaalid,mushkiladda xiriirwadaag ama taagdarrida gabowga ay haysato ee u baahan in laga kaalmeeyo nolol maalmeedka.

Gelitaan ballan la'aan

Xafiiska kaalmada qaraabada ee Bollnäs wuxuu kuugu soo dhaweynayaa adigaaga daryeelaya qaraabo dhaw fursad ah inaad waqti kuu gaar ah yeelato.

Qofka qaraabadaada ah wuxuu waqti la qaadan karaa bulshad wada joogid aad u wacan. Looma baahna inaad ballan naga sameysato ee waa iska soo gal.

Gelitaanka ballan la,aanta waxay furan tahay maalmaha talaadada saacadda 13:00-16:00. Cinwaanka waa Våggatan 11.

Warbixinta cinwaanka

Lambarka telefoonka ee kaalmada qaraabada waa **0278- 257 15**.

Boostada elektarooniga waa : anhorigstod@bollnas.se

Ka nasinta daryeelka

Haddii adigaaga ah qaraabada u baahato in aad fursad u hesho waqti gaar ah ayaa waxaan kuugu soo dhaweyneynaa ka nasinta daryeelka.

Ka nasinta daryeelka waxay ka dhici kartaa guriga qofka ama guriga amaanka ee xafiiska kaalmada qaraabada ee Våggatan 11. Ka nasinta waa lacag la'aan waxaana loogu talo galay waqti gaaraya laba saac ilaa laba

maalmood. Marka nasinta laga sameynayo guriga ammaanka(trygghetsplatsen) waxaa ka baxsan kharajka cuntada.

Kooxaha qaraabada (Anhöriggrupper)

Kooxaha qaraabada markaad ku dhex jirto ayaa waxaad la kulmaysaa dad kaloo qaraabo ah ee ku sugan xaalad taadoo kale. Waa fursad la isku dhaafsado khibrado,murugo iyo waxyaabo farxad leh ee lala qaybsanayo dadka kale ee ah qaraabo dad. Inaad wax wada sameysaan, wada ciyaartaan iyo inaad warbixino heshaan.

Hawsha firfircooni maalmeedka (Dagverksamhet)

Hawshu waa fursad loogu talo galay dadka qaraabada ee ka nasinta , sidoo kalena shakhsiga wuxuu la qaadan karaa dadka kale maalin firfircoon oo mecne weyn leh.

Hawsha firfircooni maalmeedka ee xafiiska kaalmada qaraabada waxay hawshiisu kasoo jeedaa hab dhaqancelin, taasoo hadafku yahay in la qaato maalin wacan oo wanaagsan. Xarunta hawsha firfircooni maalmaalmeedka waxay ku taallaa qolalka xafiiska kaalmada qaraabada ee Våggatan 11.

Joogitaanka waqti gaaban ee soo noqnoqoneysa (Återkommande korttidsvistelse) waxaa loogu talo galay in loo sahalsiiyo qofka shakhsiga in uu gurigiisa degganaado iyo in laga nasiyo qofka qaraabada la aha . goobaha joogitaanka waqti gaaban ee soo noqnoqota waxay ku yaalliin Ängslunda. Codsiga joogitaanka waqti gaaban ee soo noqnoqonaya kala xiriir gacanhayaha kaalmada 0278-250 00.